

## Ku darista Talaallada diiwaanka MIIC

Haddii diiwaanka Xariirka Xogta ee Talaalka Minnesota Minnesota Immunization Information Connection (MIIC) ay ka maqan yihiin xogta talaal aad qaadatay aadna hayso xogta, waxaad u diri kartaa Waaxda Caafimaadka Minnesota (Minnesota Department of Health (MDH) cadaynta macquulka ah ee talaalka oo aad u marinayo iimeelka, boostada, ama fakiska ama ka codso xarunta caafimaadka ee aad talaallada ka qaadatay haddii ay u diri karaan MDH taariikhdaada talaalka.

### Caddaynta la aqbali karo

- Waraaqda rasmiga ah ama dukumiinti elektaroonig ah oo ka imaanaaya cidda talaalka bixisay. Kan waxaa ku jiri kara dukumiintiyada ka yimaada ablikeeshinka caafimaadka sida MyChart ama kuwa lamidka ah iyo sidoo kale dukumiintiyada gacanta lagu qoray ee ka yimaada ururada aan bixin diiwaannada kumbuyutarka lagu daabaco.
- Kaarka rasmiga ah ee talaalka COVID-19 ee CDC.
- Foomka Diiwaanka Talaalka Qofka ee Waaxda Arimaha Gudaha ee maraykanka DS-3025 taas waxaa kamid ah talaallada hore ee qofka ee la xaqiijiyay.
- Caddaynta Rasmiga ah ee Shahaadada Talaalka ama Prophylaxis (kaarka jaallaha ah).

### Dirista cadaynta talaalka

Dukumiintiga waa in lagu qoraa taariikhda talaalka (bisha, Maalinta iyo Sanadka); nooca talaalka ama maadada; iyo magaca iyo taariikhda Dhalashada qofka. Caddaynta tallaalka waa in la soo diraa ugu yaraan 7 maalmood ka dib taarrikhda ugu dambeeysa ee diiwaanka tallaalka ku xusan si adeegayaasha caafimaadka waqtii ugu helaan inay xogta u gudbiyaan MIIC. Waxaad kusoo diri kartaa cadayntaada la aqbali karo ee talaalka iimeelka, fakiska, ama boostada.

**Ogsoonoow:** Haddii aad go'aansato inaad ku dirto iimeelka, waxaan ku talinaynaa inaad ku dirto iimeel baasaweer adag leh si aad u ilaalso xogtaada gaarka ah ee caafimaadka.

**Limaylka:** [health.immrecords@state.mn.us](mailto:health.immrecords@state.mn.us)

**Fakiska:** 1-877-771-6182 (ATTN: Ardayda MIIC)

**Boostada:**

Minnesota Department of Health

MIIC Operations

P.O. Box 64975

St. Paul, MN 55164-0975

Haddii aad ku heshay talaalka gobal kale, waxaad ka helaysaa xogta lagala xariiraayo Nidaamka Xogta Talaalka ee gobalkaas (IIS) [CDC: La xariir IIS si aad u hesho Diiwaannada Talaalka \(www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html\)](https://www.cdc.gov/vaccines/programs/iis/contacts-locate-records.html).

Minnesota Department of Health

[www.health.state.mn.us/miic](http://www.health.state.mn.us/miic)

12/01/2023 (Somali)